

# JADWALKA U QALMIDA SOCDAALKA IYO DHALLASHADA

Barnaamijka	Dhallasho ama Jinisiyad	Dadka deegaanka haysta Sharci Joogto ah (da'doodu tahay 19 iyo kaweyn)	Dadka deegaanka haysta Sharci Joogto ah (da'doodu kayartahay 19)	Qaxootida, Dadka magan galyo doonka ah, Dhibanayaasha usoo galay dhibaato banii'aadanimo kale	Soogalootida Hadda U jooga Si Sharci ah	Soogalootida Aan Laqorin
Deymaha Canshuurta Lacagta Bilaha Ceymiska Caafimaadka iyo Dhimista Waddaagista Qiimaha	✓	✓	✓	✓	✓	—
Washington Apple Health ee loogu talodalay Dadka waaweyn (da'doodu tahay 19-64)	✓	✓	NA	✓ <sup>1</sup>	— <sup>2</sup>	—
Washington Apple Health ee loogu talogalay Dumarka Urka Leh (da'doodu tahay 19-64)	✓	✓	NA	✓	✓	✓ <sup>4</sup>
Washington Apple Health ee loogu talogalay Caruurta (da'doodu tahay 1-18)	✓	NA	✓	✓	✓	✓ <sup>4</sup>
Caafimaadka Degdega ah Ee Loogu Talogalay Qofka Shisheeyaha Ah	—	✓ <sup>5</sup>	—	—	✓	✓ <sup>4</sup>

✓ U qalma    — Aan U Qalmin    NA Aan Ladabakhi karin

## 1. Soogalootida U jooga Si Sharci Ah "U qalma": Waxaa khasab ah in uu buuxiyo 5-sanno reebid ah aan ka ahayn haddii laga reebay. (\*) sheegaysa kareebida laga bilaabo 5- sanno reebid.

- Dadka deegaanka haysta Sharci Joogto ah (LPR) – ay kujiraan:
  - \*Aasiyaanka Mareykanka ah kuwaas oo ay dhaleen muwaadhin Mareykanka ah oo kamid ahaa adeegihii ciidamada hubaysnaa ay kusameeyeen Bariga Koonfurta Aasiya intii lagu guda jirey Dagaalkii Fiitnaam.
- \*Qaxootida – ay kamid yihiin:
  - \*Hmong iyo Dhulka sare ee Laotions;
  - \*Soogalootida khaaska ah ee kayimid Ciraaq ama Afgaanistaan; iyo

- \*Dhibanayaal kuyimid qaab tahriib ah.
- \*Dadka magan galyo doonka ah.
- \*Soogalootida Cuban/Haitian.
- \*Dad lasiiyay diidmo musaafurin ama qaadis.
- Dadka Xabsi Si Shuruud Ah Looga Soo Daayay – haddii lasiiyay xabsi kasii dayn loogu talagalay ugu yaraan hal sanno ah.
- Xad gudub xaasas/caruur gaar ah – ay kamid yihiin kuwaan haysta:
  - Oggaysiis I-130 oo ah oggolaansho “marka hore” ee lasugayo ama codsi-shakhsi oo hoos imaanaya Qaanuunka Dhibaataada Lidka Ku Ah Dumarka (VAWA).
- Loogu oggolaaday Mareykanka sida soogalooti shardi kuxiran kahor bisha Abriil 1, 1980.
- \*Dadka deegaankahaysta Sharci Joogto ah, Dadka xabsi si shuruud ah looga soo saarey, ama xadgudub shisheeye kuwaas oo sidoo kale ah xubno katirsan adeegaha ciidanka ama halyeey hore, ama xubin qoys kamid ah hayeeyadii hore sida hoos loogu sharxay:
  - \*Kahaya waajib hawlgal ciidanka Mareykanka, aan ahayn waajib hawlgal loogu talagalay tababar;
  - \*Halyeey hore oo ciidanka Mareykanka ah midkaas oo si sharaf leh looga saarey ciidanka;
  - \*Hayleey hore oo kamid ah ciidanka Filibiiniska midkaas oo soo adeegay kahor taariikhda 07/01/46;
  - \*Xaas ama nin, carmalo aan- dib u guursan ama carmal; ama
  - \*Ilmo dad kutiirsan oo aan guursan oo ah xubin halyeey hore ama qabanaya adeeg waajib shaqaynaya.

FIIRO GAAR AH: Kareebida 5-sanno ma ahan mid lagu dabakho dadka kuhelay xaalada “shisheeyaha u qalma” gudaha 5 sanno ee u dambaysa, haddii ay soogaleen Mareykanka muddo kahor 8/22/96 uguna noolaayeen Mareykanka tan iyo 8/22/96. Fiiri WAC 182-503-0535.

FIIRO GAAR AH: Lambarka kuqoran kaarka cagaarka ah wuxuu sheegayaa sida Dadka deegaanka haysta Sharci Joogto ah ay kusoo galeen Mareykanka haddii ay kusoo galeen Mareykanka hoosta xaalad kabaxsan reebida 5-sanno ayna haysteen xaalada Dadka deegaanka haysta Sharci Joogto ah wax kayar 5 sanno, weli waxay yihiin kuwo kabaxsan reebida 5-sanno ah.

## 2. Soogalooti U Jooga Si Sharci ah “Aan-U qalmin”:

Kuwaan waa kuwo aan-ahayn muwaadhiniin kuwaas oo si sharci ah u jooga dalka Mareykanka oona kujirin qeexitaanka shisheeyaha u qalma ee kor lagu qorey. Shisheeyaasha baddan ee aan-u qalmin waxaa kamid ah:

- Muwaadhiniinta Jaziiradaha Marshall, Micronesia ama Palau.
- Soogalootida xabsi looga soo daayay si shardi ah dalka Mareykanka waxkayar hal sonno.
- Soogalootida si kumeelgaar ah loo siiyey xaalad la ilaaliyay (TPS).
- Aan ahayn soogalooti kuwaas oo loo oggolaaday in ay usoo galaan Mareykanka ujeedo xadidan oo loogu talagalay waqti xadidan, sida:
  - Booqashooyin ganacsi;
  - Arday; iyo
  - Dalxiisayaal.
- Shisheeyayaal lagu xadgudbey kuwaas oo qaraabo u ah muwaadhin u dhashay Mareykanka oo haysta codsi ama caddeyn I-130 la oggolaaday laakiin aanan buuxin shuruudahakale ee soogalootida lagu xadgudbey ah, sida lagu sharxay gudaha WAC 182-503-0530. Shisheeyayaasha lagu xadgudbey kuwaas oo kuhaysta codsi-shakhsi hoosta VAWA laakiin aanan weli helin u qalmida “Oggaysiiska Marka Hore”, sida lagu sharxay gudaha WAC 182-503-0530.
- Codsadayaasha loogu talagalay haggajinta xaalada, magan galyo doon, burinta qaadista ama kasaarida, joojinta musaafurinta, ama hakinta musaafurinta amaqaadista.
- Burinta qaadista, ficilka dib loo dhigay {\*wata kareebida Ficilka Dib u dhigida Imaatinka Caruurnimada (DACA)} ama joojin ahmusaafurinta labixiyay. (Xusuusnoow: haddii qof lasiiyo burin qaadista ama joojinta musaafurinta kudhisan in laguugu xadgudbey ama lagu siiyay ficil dib u dhigid kudhisan oggolaanshaha codsi-shakhsi oo ah sida shisheeye lagu xadgudbey, waxay yihiin markaasi “shisheeye u qalma”.)
- Tegida xooga ah ee labixiyey ee dib loo dhigay.
- Midnimada qoyska labixiyey.
- Xaaladaha “K”, “S”, “U” ama “V”, fiisada qofka laqoondeeyay, ee u oggolaanaysa dadka haysta in ay shaqeeyaan ugu dambeyntana ay haggajin kusameeyaan xaaladaha Dadka deegaanka haysta Sharci Joogto ah (LPR).
- Dadka deegaanka haysta sharci kumeelgaar ah oo hoos imaada barnaamijka cafiska ee Dib u habbeynta Soogalootida iyo Qaanuunka xakamaynta (IRCA), ay kujirto kuwa lagu oggolaaday hoosta Qaybaha 210 (“shaqaalayaal beereed khaas ah”) iyo 245A ee INA.
- Amarka joojinta labixiyey.
- Uqalmid loogu talagalaycodsashooyinka ah sida dhallinyarada soogalootida khaaska ah. Kuwaan waa dhallinyaro lagu caddeeyay “kutiirsanaha gobolka” iyo u qalmida loogu talagalay daryeelka barbaarinta muddada-dheer ee sabab u ah xadgudub, dayicid ama kategid.
- Joogidah musaafurin ama kasaarida labixiyey.
- Tegidaikhtiyaariga ah ee labixiyay – waqti xadidan ama aan xadidnayn.

\*Qofka lasiiyey xaalada Ficilka Dib u dhigida Imaatinka Caruurnimada ma ahan mid u qalma barnaamijyada Apple Health ee dowlad ahaan-loo maalgeliyay ama u qalma ka iibsiga ceymis kujirida daryeelka caafimaadka tooska QHP/HIPTC. Ayaga waa kuwo laga yaabo in ay u qalmaan barnaamijyadaan soo socda: Apple Health Maalgeliyay-Gobolka ee loogu talagalay Caruurta iyo Dumarka Uurka leh, barnaamijka Caafimaadka Degdega Shisheeyaha, iyo Adeegaha Daryeelka Caafimaadka.

**3. Dadka Deegaanka Haysta Sharci Joogto Ah** kuwaas oo soo galay Mareykanka kadib 8/22/1996 waxaa khasab ah in ay kujiraan xaalada Dadka Deegaanka Haysta Sharci Joogto Ah ee loogu talagalay shan sanno kahor inta aynaan noqon kuwo u qalma ceymis kujirida Dadka waaweyn ee Washington Apple Health Mudadaan shanto sanno ee sugida dowlada ma ahan mid lagu dabakhi karo Washington Apple Health ee loogu talagalay Dumarka Uurka leh ama barnaamijka Caafimaadka Degdega Shisheeyaha.

**4. Barnaamijka Washington Apple Health waa “barnaamijka dalada”** midkaas oo koobaya barnaamijyo kaladuwan oo loogu talagalay tiro dad aad u xadidan. Waa muhiim in aad xusuusatid in qaar kamid ah Barnaamijyada Washington Apple Health laga maalgeliyay sida qayb ka ahaatay Dowlada Federaalka, iyo in qaar barnaamijyadaas kamid ahi laga maalgeliyay keliya dhinaca Gobolka Washington.

**5. Dadka Deegaanka Haysta Sharci Joogto Ah** kuwaas oo aan uur lahayn ama kuwa aanan kuqancin mudada sugitaanka dowlada 5-sanno ah oo aanan ahayn kareebid, waxaa dhici karta in ay noqdaan kuwo u qalma Caafimaadka Degdega Shisheeyaha haddii ay qabbaan xaalad caafimaad u qalimid degdeg ah.



Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo caawimaad balaash ah iyo macluumaad kuqoran luuqadooda hooyo. Si aad qof ugula hadasho si balaash ah luuqad aad fahmayso, wac 1-855-923-4633. Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah, booqo: [www.wahbexchange.org/language-resources](http://www.wahbexchange.org/language-resources).